



BPHC, TB Clinic  
BMC Yawkey Bldg, 3<sup>rd</sup> Floor  
850 Harrison Ave.  
Boston, MA 02118  
(617) 534-4875

# Dawada Tiibyda

# Rifater

## Maxay tahay dawadani?

Rifater (oo ah kiniin cas oo wareegsan) waxa ku jira 3 dawo (Isoniazid, Rifampin iyo Pyrazinamide) waxana loo isticmaalaa daweynta tiibyda.

## Sidee baan u qaataa kiniinkan?

Qaado \_\_\_\_\_ kiniin maalin kasta hal mar mudo ah \_\_\_\_\_ bilood.

- Ha iloobin qaadashada kiniinkan.
- Qaado kiniinkan isku wakhti maalin kasta sida laguugu sheegay quraaradda ama dhalada dawada.
- Haddii aad ilowdid inaad qaadatid kiniinka wakhtigii caadiga kuu ahaa, qaado wakhtiga ugu dhakhsaha badan ee aad xusuusatid.
- Ha qaadan laba jeer tirada kiniinka si aad uga daba tagtid intii ku dhaaftay.
- Ha qaadan dawooyinka asiidha ama aashitada caloosha (sida Maalox iyo Mylanta) 2 laba saacadood ka hor iyo 2 saacadood ka dib qaadashada kiniinka.



## U sheeg dhakhtarkaaga/kalkaalisada xarunta haddii:

- Aad uur leedahay, naas-nuujinaysid ama aad ku talo-jirtid inaad uur yeelatid.
- Aad ku talo-jirtid inaad qaadatid dawo ama kiniin kale oo cusub.

## Waxyaabaha la rabo inaad u sheegtid dhakhtarka ama kiliiniga isla markiiba:

Jooji dawada wacna dhakhtarka ama kiliiniga isla markiiba adiga oo wacaya (617) 534- 4875 haddii aad isku aragtid dhibaatooyinka soo socda.

- Finan maqaarka ah ama cuncun
- Cadaadis laabta ah
- Calool qasan
- Isha qaybta cad oo hurdi ama jaale noqotay ama maqaarka oo hurdi ama jaale noqday
- Daal aad u badan
- Madax-xanuun ama dawakhid daran
- Qandho
- Kabuubyo gacmaha ama cagaha ah
- Aragga oo isku darsamay
- Rabitaanka cuntada oo kaa maqan
- Kaadi madow ama midabka Kooka-Koola u eeg
- Wax kasta oo aad walwal ka qabtid ama aad u malaynaysid inuu xidhiidh la leeyahay dawada



## Muhiim:

- HA cabbin aalkolo ama HA qaadan acetaminophen (Tylenol) inta aad qaadanaysid kiniinkan.
- Haddii aad qaadatid kiniinka xad-u-yeelista uurka, isticmaal noocyo kale oo ah xad-u-yeelista uurka (sida cinjirka galmada) sababta oo ah waxay qas galin kartaa kiniinkaaga xad-u-yeelista uurka waxana aad yeelan kartaa uur.
- Waxa laga yaabaa in kaadidaada, dhididkaaga, candhuuftaada iyo ilmadaadu isu beddesho midab ah casaan ama liin (taasi waa caadi).
- Lensiska aragga ee jilicsani si joogto ah ayay u noqon yeelan karaan midab liin ah.
- Waxa laga yaabaa in dawadani keento inaad dareen badan u yeelatid iftiinka. Gasho dhar badbaado leh, isticmaal labeenta lidka qorraxda iyo muraayadaha qorraxda.
- Waxa laga yaabaa in dawadani kuu keento inaad si fudud maqaar burbur aad u yeelatid.

**\*\*\*Wac (617) 534-4875 haddii aad qabtid walwal ama su'aalo \*\*\***

La cusbooneysiya 3/05 (SOMALI)